**Somalia Non-State Actors (SONSA)**

www.sonsaplatform.com/ info@sonsaplatform.or /Executivedirector@soscensa.org +252612870023

## WAR SAXAAFADEED

Muqdisho 14 July 2025: Waxaa maanta shir degdeg ah iskugu yimid Dalladda Bulshada Rayidka Soomaaliyeed ee SONSA kaas oo looga hadlaayey caqabadaha dalka ka jira sida wadahadaladii u socday Dowladda Federaalka iyo Golaha Samatabixinta oo galay marxalad adag iyo nidaamka ay Dowladda kula wareegeyso dhulalka danta guud iyo dhibaatooyinka ka dhashay.

### Arrimaha Siyaasadda

Dalladda Bulshada Rayidka waxa ay aad oga xuntahay natiijo la'aanta shirka wadahadalka Dowlada Federaalka iyo Golaha Samatabixinta. Wadahadalada labada dhinac oo qaatay muddo labo bilood ah waxa ay dadka Soomaliyeed ka filayeen in natiijo laga gaaro khilaafka siyaasadeed ee caqabadaha ku noqdey geedi socodka dowlad dhiska Soomaliyeed.

Saameynta khilaafka siyaasadeed ayaa noqdey mid sii fogeenayo kalsoonida ay shacabka Soomaaliyeed ku qabaan dowladnimada, kala qaybinta bulshada iyo geedi socodka dhismaha dowladnimada.

Bulshada Rayidka waxa ay aaminsan tahay in ay muhiim tahay heshiis laga gaaro arrimaha salka ku haaya khilaafka siyaasadeed si loo ilaaliyo midnimada umadda Soomaliyeed iyo wadajirkooda.

Sidaas darteed, Bulshada Rayidka waxa ay soo jeedinayaan in sida ugu dhaqsiyaha badan la iskugu soo noqdo wadahadaladii u dhaxeeyey madaxda Dowladda federaalka iyo golaha samatabixinta si wada hadaladaas ay mirro-dhal u noqdaan waxaana lagama maarmaan ah in ay labada dhinac tanaasul buuxa ka sameeyeen arrimaha ay isku hayaan iyado la tixgelinaayo danta dalka iyo dadka Soomaaliyeed.

Bulshada Rayidka waxa ay ka shaqeyneysa waxii farsamo ah iyo talooyin isku soo dhaween kara labada dhinac si xal waara looga gaaro khilaafka siyaasadeed.

### Arrimaha Dhulka Danta Guud

Dalladda Bulshada Rayidka waxa ay aad uga xun tahay arrimaha dhulka ku saabsan oo wayaahan keenay kalsooni darro u dhaxeeysa shacabka iyo Dowladda.

Bulshada Rayidka waxa ay marar badan ku baaqdey sida looga baahan yahay in Dowladda la timaado qorsho iyo siyaasad cad oo ay kula wareegeyso dhulalkii danta guud si looga hortago dhibaatooyinka ka dhalan kara qaabka ay hadda wax ku socdaan.

Bulshada Rayidka waxa ay aaminsantahay khalalaasaha ka taagan dhulalka danta guud in ay horseedi karaan xadgudub xuquuqda aadanaha, kalsooni darro shacabka iyo dowladda sidaas dawgeed waxa ay ku celineysaa baaqoodii ahaa in loo baahan yahay siyaasad qorsheysan oo u saamixi karta sida wax looga qaban lahaa dhulalka danta guud iyo shacabka ku nool.

Ugu dambeyntii, Bulshada Rayidka waxa ay soo jeedineysa in loo dhimriyo shacabka Soomaaliyeed, lagana fogaado wax kasta oo keeni kara khilaaf dhexmara bulshada iyo Dowladda.

SOMALIA NON-STATE ACTORS
JILAYAASHA AAN DOWLIGA AHEYN EE SOOMAALIYEED
SONSA

DHAMAAD